

Ku soo dhowoow dugsiga!

SKAP

dialog



Somali

Waxa aad waxtar ka geysan kartaa waxbarashada ilmahaaga

Ma ogeyd in....

- in fikirka fiican ee aad ka qabto dugsigu uu ka qayb qaato ka helidda ilmaha ee dugsiga, xiisiihiisa iyo waxbarashadiisa. Ka helidda/xiisuhu waxa uu lagama maarmaan u yahay waxbarasho tayo leh.
- in filashada ilmaha, taageeradiisa, hagiddiisa iyo jawaabcelinta laga siiyo waxbarashadiisu ay macne weyn oo aan dadka badankoodu ogeyn u samaynayso ilmaha?
- in ay ilmaha macne weyn u samaynayso in uu muujiyo waxa uu soo bartay iyo waxa uu dhigto?
- in marka aad ilmaha ku caawinayso casharada guriga, ay weydiinta su'aashu ka muhiimsan tahay in jawaab loo helo su'aalaha oo dhan?

Sidan ayaad u caawin kartaa ilmahaaga!

- Waxa aad ilmaha u jeclaysiin kartaa akhriska adiga oo
- la akhriya ama la dhegaysta buugaag ilmaha
 - uga sheekeeya dhacdooyin, majaanjilo iyo halxiraale
 - kula dheela luqada iyo xarfaha

- Waxa aad ilmaha u jeclaysiin kartaa xisaabta adiga oo
- ilmaha kala raadiya xisaab nolol maalmeedka
 - la ciyaara ciyaaro oo kula dheela tirada iyo sawirada muuqaalka
 - weydiya ilmaha in ay kuu sheegaan waxa ay soo bardeen iyo macnaha eray bixinada



Adeegso kulanka guriga iyo dugsiga

Ma ogeyd in....

kulanka waalidka/kulanka horumarintu (konferansetime) uu yahay kulan muhiim ah? Waa kulan dhex maraya adiga iyo macalinka xidhiidhiyaha ah oo ku saabsan ilmahaaga. Waxa sharcigu dhigayaa in ay dhacaan laba kulan oo noocan ahi sannad-dugsiyeedkii laba goor. Kulamada waalidiinta oo dhan (foreldre møtene) waxa aad kula kulmaysaa waalidiintii kale iyo macalimiintii. Kulan waalid oo fiican waxa u astaan ah dhaqdhaqaaq iyo wada hadal

Su'aal soo jeedi!

Kulanka waalidiinta waxa aad ka soo jeedin kartaa su'aalahan:

- Muxuu dugsigu naga filanayaa annaga haddii aanu nahay waalidiinta?
- Maxaan ka filan karaa anigu dugsiga?
- Maxaan samayn karaa si aan guriga ugala socdo waxbarashada ilmaha?
- Sidee wax uga tari karaa in la helo xidhiidh wadajir bulsho iyo deegaan waxbarsho oo fiican?

Wadajir waalid oo wanaagsan waxa ku jirta danta ilmaha. U hawlgal sidii aad uga qayb qaadan lahayd dhaqdhaqaaqyo (aktiviteter) aad isku sii baran kartaan waalidiinta kale.

Noqo xidhiidhiye waalid!

Waalidiinta ilmahoodu wada dhigtaan isku fasal ama isku koox waxa ay sannad walba iska dhex doortaan xidhiidhiyayaal waalid. Xidhiidhiyaha waalidku waa isku xidhaha waalidiinta iyo dugsiga. Xidhiidhiyaha waalidku waxa uu wadashaqayn kala samayn doonaa xidhiidhiyaha fasalka arrimaha ay ka mid yihiin qabanqaabada iyo fulinta kulamada waalidiinta. Yay ku dhaafin fursadani – noqo xidhiidhiye waalid!

Warbixin xidhiidh oo muhiim ah!

Magac

Taleefan

E-mail

Macalin

Xidhiidhiye waalid

Xidhiidhiye waalid

www.fug.no

Guddida waalidiinta ee dugsiyada hoose/dhexe (FUG) waa gole talobixineed oo talo bixin siiya Wasaaradda aqoonta. FUG waxa ay ilaalin doontaa danaha waalidiinta ee dugsiga, waxana ay ka shaqayn doontaa wadashaqayn fiican oo dhexmarta guriga iyo dugsiga.

Foreldreutvalget for grunnsopplæringen

Postboks 9360 Grønland, 0135 Oslo
post@fug.no